

## LISENADA IYO DACWOYINKA

Waxaad dhowrtaa qiimo kala duwan. Gobolku waxa uu kuu hubinayaa xadka xanaanaynta ee ugu yar, laakiin xataa xanaanoyinka leh lisenku waxay bixiyaan howlo kala wanaagsan. Adigaa ah garsooraha ugu fiican ee caruurtaada baahidooda.

### Sidee ku helaa wararka barnaamijyada xanaanada ee haysta lisenka?

Haddii aad filayso inaad cunigaada ku qorto xanaano leh lisenka, waxaad ogaan kartaa haddii wax dacwada ah laga soo sheegay barnaamijkaas xanaanada adigoo wacaaya bixiyaha lisenada ee ku haboon. Si aad ku hesho lambarka iyo magaca Lisenka qofka bixiyay ama wixii lisenada barnaamijka xanaanada caruurta (Guryaha Xanaanada Qoyska ama Xarumaha) ee King County, Fadlan wac 1-866-482-4325. Waxaad kaloo wararka ka heli kartaa online ee Qeybta Howlaha Bulshada iyo Caafimaadka.

Qeybta Xanaanada Caruurta iyo waxbarida hore - **Seattle** Fadlan ogow: **web site-ka Region 4A hada ma shaqeynayo — fadlan wac 206-721-6941 wixii warar ah.**

Qeybta Xanaanada Caruurta iyo Waxbarashada Hore - **Kent**

Waxaad kaloo ka fiirin kartaa Lisenka iyo wixii dacwada xaaladooda ee barnaamij qaas ah adigoo la xariiraya **Habka Warbixinta Xanaanada Caruurta ee Lisenka Gobolka** web site-ka ama wacaya 1-866-48CHECK.

### Lisenada iyo Dacwooyinka

Qeybta Xanaanada Caruurta iyo Waxbarida hore waa qeyb ka tirsan Qeybta Howlaha Bulshada iyo Caafimaadka (DSHS) ee Gobolka Washington. DSHS waxay bixisaa Lisenada iyo ilaalisaa xarumaha xanaanada caruurta iyo Guryaha xanaanada caruurta ee qoyska, baartaa dacwooyinka xarumaha xanaanada, iyo bixisaa wararka bulshada ee xanaanada caruurta.

Qof kasta oo bixiya xanaanada caruurta, wixii aan ka ahayn ilmihiisa waxa qasaba inuu lisen ka qaato DSHS. Lisenku waxa uu muujinayaa in barnaamijku oo buuxiyay sharuudaha ugu yar ee loga baahan yahay Gobolka Washington.

### Sidee ku buuxiyaa Dacwad?

Si aad ku soo sheegto jabin sharuudca lisenka ama waxyeelid ilmo ee xanaanada caruurta ama Guryaha xanaanada caruurta ee qoyska, wac (206) 721-6500 oo riix “5” haddii aad su’aal ka qabto sida dacwada loo sameeyo, fadlan nagala soo xariir:

- ▶ Telefoonka: (206) 329-1011
- ▶ E-Mail: [parse@childcare.org](mailto:parse@childcare.org)

### Maxay tahay xaquuqdayda sharciga curyaaminta America?

Sharciga Curyaaminta America waa sharci dowlada federaalka waxana uu dhaqan galay 1992. Sharcigasi waxa uu oronayaa in dadka curyaaminta ihi ay leeyihiin xuquq la siman dadka kale ee xaga Shaqada, howlaha gobolka iyo degaanka, meelaha bulshada sida iskuulka ilmaha yar yar, xanaanada caruurta, iyo Guryaha xanaanada caruurta ee qoyska. ADA waxa uu ka doonayaa in bixiyayaasha Xanaanada caruurta aanay ku kala takoorin qofna cuuryaanimo iyagoo ku saleeynaya curyaanimadiisa. Xanaanada caruurta waa inay wax ka badalaan sharuudooda iyo xarumahooda iyagoo u sameeynaya si u sahlan dadka cuuryaaniinta ah, haddii aanay wax weyn ka badalaynin habka uu ku dhisan yahay barnaamijku. Wixii warar dheeraada iyo dacwada, Fadlan la xariir Qeybta Cadaalada.

- ▶ Telefoon 1-800-514-0301
- ▶ Web Site: <http://www.usdoj.gov/crt/ada/adahom1.htm>

### Sido kale fiiri

- ▶ [Maxay yihiin doorasooyinkayga Xanaanada Caruurta?](#)
- ▶ [Sidee lagu doortaa Xanaano caruur bixiye?](#)